

Wargeyska Mountain View

Oktoobar 26, 2016

Isniin, Oktoobar 31.....Halloween, Ardayda Waxay Tagi Doonaan 12:40
Jimco, Nofeembar 4.....Guddiga Bulshada Dugsiga, Maktabka marka ay tahay 3:30
Talaado, Nofeembar 8.....Waalidiinta iyo Macmacaanka, CLC marka ay tahay 8:30

Fariinta Agaasimaha

Halloween waa waqti farxad leh oo loo labbisto si ka duwan ama si laga helo, macmacaan la cuno iyo waqti lala qaato qoyska iyo asxaabta. Mountain View, waxaan ka helnaa socodka labbiska ardayda. Waxaa laguugu casumay in aad fiirsatid socodka. Waxaan codsaneynaa in inta badan waalidiinta, ilaa inta suurtoogalka ah, isugu yimaadaan qolka shirarka si ay u arkaan socodka ardayda. Kaddib marka aan ka soo wadno fasaladooda, dhamaan ardayda waxay ka soo geli doonaan qolka shirarka. Marka socodka soo maro qolka shirarka, ardayda waxaa la geyn doonaa fasalada, kaddibna safka soo hara, wuxuu mari doono qolalka. Waxaan ogolnahay labbiska loo qaato socodka Halloween, hase ahaatee waxaan codsaneynaa in aysan jirin arday ama qaangaar soo qaata labbis muujiya dhiig xad dhaaf ah ama dhiig la daadiyay. Waa la ogol yahay maaskarada inta uu socdo bandhiga keliya, kaddibna waa in meel leyska dhigo, bandhigga ka hor iyo kaddib. Ugu dambayn, fadlan ha ogolaanin in ay ardayda dugsiga u soo qaataan waxyaabaha hubka u eg. Inkastoo aysan ahayn hub dhab ah, waxaan codsaneynaa in guriga lagu haysto si aysan u noqonin wax ardayda ka sii jeediya dugsiga.

Waxaan kaloo codsanaa in aan xushmeyno hiddaha iyo diimaha ay aaminsan yahiin dadka kale iyo in aan loo labbisaniin sida qof ka tirsan isir ama hiddo kale. Tusaale ahaan, waxay noqon kartaa wax dhalliya xanuun aad u badan iyo sharaf darro loo geysto asxaabtena hindida iyo qoysaska haddii aan labbisano labbiskooda hiddaha iyo/ama dhaqanka. Hiddaha labbiska Halloween waxaa badanaa loo haystaa in uu yahay sida wax lagu qoslo. Tani awgeed, qaadashada labbiska hiddaha kooxaha isirka iyo jinsiyadaha kala duwan, waxay kuwa ka soo jeeda hiddahaas u arkaan in ay tahay sharaf darro loo geysto caqiidadooda hiddaha iyo dhaqankooda aadka muhiimka u ah.

Fadlan nagu kaalmee in aan xushmeyno hiddooyinka kale, idinka oo Halloween u soo labbisaniin ama u soo labbisin caruurtiina labbiska hiddaha dadka kale. Waad ku mahadsan tahay kaalmada aad ka geysatid xaajadaan.

Waalidiinta iyo Macmacaanka

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaaho in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qaban doono Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha waxaa lagu qaban doonaa Community Learning Center (Xarunta Waxbarashada Bulshada) maalinta Talaadada, Oktoobar 8, marka ay tahay 8:30. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.

Waxaa Iminka La Aruuriyaa Sumadaha Sanduuqa

Waxaa ka soo wareegatay dhowr sanno marka dugsigena si rasmi ah uga hadlay aruurinta Sumadaha Sanduuqa Waxbarashada (Box Tops for Education). PTO dugsiga waxay ka hadashay baahid loo qabo in hanti loo aruuriyo baahida dugsiga, sidaas darteedna aruurinta Sumadaha Sanduuqa waa hab fudud oo lagu bilaabo. Waa hubaal, ma aha in aan qoysaska weydiisaneyno in ay iibsadaan badeeco si ay u helaan calaamadda Sumadda Sanduuqa, hase ahaatee marka aad iibsatid raashin oo baakada korkeeda ku leh Sumadda Sanduuqa, fadlan u dhiib cunugaada si uu u keeno dugsiga. Waxaan bilaabi doonaa in aan soo aruurino kuwaan maalinta Isniinta, Oktoobar 31. Waad ku mahadsan tahay in aad ka soo qeybgashay. Lacag kasta oo yar waa kaalmo.